# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 1036
# WARQADDII KOWAAD EE RASUUL BUTROS
# 1:14-23

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."**

Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay Warqaddii kowaad ee rasuul Butros. Waxaa warqaddu isugu jirtaa waxbaris, guubaabo iyo weliba dhiirrogelin.

Isagoo guubaabinaya masiixiyiinta ayaa waxaa rasuuul Butros leeyahay sida ku qoran isla Warqaddan kowaad 1:13, oo leh: **"Haddaba isku giijiya guntiga maankiinna, dhug yeesha oo aad u rajeeya nimcada laydiin keeni doono markii Ciise Masiix la muujiyo."**

SONG: REEL----CUT--------

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal aayaddii 14aad ee isla cutubka 1aad

markaasoo rasuulku lahaa: **"Idinkoo ah carruur addeec leh ha raacina damacyadiinnii hore oo aad ku samayseen jaahilnimadiinnii."** Haddaba waxaa rasuulku leeyahay, **"idinkoo ah carruur addeec leh."** Waa qorniinka kan inagu hagaya adeecista. Waxaad xusuusataan in Rasuul Yacquub inagu yiri, **"Noqda kuwa hadalka yeela laakiin ha ahaanina kuwa hadalka maqla oo keliya."** Marka ay sidaas tahay Hadallada Ilaah inama siiyaan rajo oo keliya, laakiin waxay inoo hoggaamiyaan dhanka adeecista. Hadallada Ilaah inagula hadlayo waa in la addeeco; oo waa inaynu u soo dhacno tusmooyinkooda. Maxaa haddaba Ilaah u doonayaa inaynu ka soo tagno qaab-nololeedkayagii hore?

Waxaa ugu wacan in uu doonayo inaynu Hadalladiisa u soo jeesanno, kuwaasoo ahmiyad weyn u leh qofka rumaystay nolosha Masiixa. Waxaana Qorniinku leeyahay: **"Ha raacinina damacyadiinnii hore, waana inaan loo soconin qaab-nololeedkii hore."** Waa inaynu dadka u muujinnaa inaynu iska beddelnay xagga gudaha ama fikirka, iyo inaynaan dadka u dhoolla-caddayn iyadoo aynaan xagga gudaha kala jirin qofka.

Waxaa la doonayaa in sida aynu qofka u aragno aynu ula hadalno ama ula macaamiloonno. La dooni maayo inaynu wax u qarinno qofka oo aynu la mid noqonno gabyaagii Soomaalida ahaa oo yiri: **"Allahayow nin ii daran maxaan daafta hore seexshay, nin ii dayaaqsanayana maxaan daafi u kariyey, ma degdegina xaajada maxaan hadalka deeqsiiyey."** Nin aad u og tahay inaad necebtahay ayaad soo dhowaysa-naysaa. Taas la dooni maayo, haddii aadan qofka jeclayn,

bannaanka kala mara, oo been ha isku sheegina. Markaan faallada soo gaabiyo la dooni maayo inaynu noqonno kuwo laba-wejiileyaal ah. Waa inaynu Ilaah dhankiisa u badanno oo dadkana u muujinno in rumaysadkeennu yahay mid aan laba-weji lahayn, oo hanuunkuna uu yahay mid dhammaystiran. Haddaan faalladii aayaddii 14aad intaas uga babxno ayaannu imminkana dib ugu soo noqonaynaa meeriska cutubka 1aad aayadda 15aad, baalka 405, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiinse siduu kan idiin yeedhay qoduuska u yahay, idinkuna sidaas oo kale dabiicaddiinna oo dhan qoduus ku ahaada."**

Qoduusnimadu waa sheey aan aalaaba la garanaynin ama si khladan loo fahmo. Badanaa dadku waxay qoduusnimada u fahmeen wax layska dhigo, iyo in wax waliba ee nolosha khuseeya aragti kale laga qaato. Waxay la noqonaysaa in wax waliba si kale loo arko, iyadoo dadka kale oo dhan loo arkayo sida wax aan waxba ahayn.

Ha yeeshee saaxiib, Rabbigu wuxuu doonayaa in qofnimadaadu ayan dhalan rogmin. Wuxuu doonayaa inaad nolosha ku raaxaysato oo aad faraxsanaato-taasina maahan in loo macnaysto inaad ku raaxaysato waxyaabo kuu keenaya dunuub, laakiin waxaa la doonayaa inaad ku raaxaysato noloshan. Qoduusnimadu waxay noolosha ruux ahaaneed u tahay caafimaad, isla sida nolosha jidhku ay caafimaadka ugu raaxaysato.

Kuwa caafimaadka qaba waxaa ka muuqda dhiifoonaan, iyo rajo iyo fayaqab. Qoduusnimadana waxay nolosha ruux ahaaneed siisaa caafimaad iyo fayaqab xagga

gudaha ah. Haddaba waxaynu u baahan nahay dadka caynkaas oo kale ah maanta. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubkan kowaad ee Warqaddii kowaad ee rasuul Butros ayaannu haatan idiin akhriyeynaa aayadda 16aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Maxaa yeelay, waxaa qoran, Idinku waa inaad qoduus ahaataan, waayo, aniguba qoduus baan ahay."**

Haddaba markan la leeyahay qoduus ahaada aniguba qoduus baan ahay, ayaan loo fasiran karin in qoduusnimadayadu ay gaarsiisnaato heerka Ilaah. Ilaah waa kaamil, oo innagu ma yeelan karno heerka kaamilnimada Ilaah inta aynu dunidan ku nool nahay. Waxaasne la kulmay kuwo ay la tahay inay gaareen heerka qoduusnimada Ilaah ka doonayo.

Balse heli maayaan qof uga markhaati-kacaya inay gaareen heer qoduusnimo oo gaarsiisan heer lagu timaamo kan Ilaah. Haddaba maxay ka macne tahay marka rasuulku leeyahay, isagoo soo xiganaya Qorniinka qoduuska ah, oo xusuusinaya dadka wixii Ilaah yiri, markuu lahaa: **"Qoduus ahaada waayo aniguba Qoduus baan ahay?"**

Haddaba Ilaaheennu waa kaamil, oow uxuu leeyahay shakhsiyad wanaagsan. Inkastoo aniga iyo adigu aynu banii'aadan nahay, haddana xagga garaadka ayeynu ka weynaanaynaa oo carruur sii ahaan mayno markii aynu baranno Hadallada Ilaah. Haddaba haddii qofi carruur yahay, waa xagga ruuxa e, haddana wuxuu leeyahay fursad uu ku koro ama xagga ruuxa kaga baaluqo.

Balse haddii uu wakhti dheer qofku Masiixa ahaa, laakiin aanu dhalinin wax miro ah, qofkaas isaga ah

wax baa ka khladan. Maaddaama aynu masiixiyiinm nahay, waa inaynu xagga Ruuxa ka kornaa. Haddaba su'aashu waxay tahay sidee baa lagu helayaa koritaanka caynkaas oo kale ah? Waxaa lagu helayaa Hadallada Ilaah ee Nool. Haddaan dib ugu soo noqonno meeriska cutubka kowaad ee Warqaddan kowaad, ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 17aad Waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddaad Aabbow ugu yeedhaan kan nin walbaba u xukuma eexasho la'aan iyo sida shuqulkiisu yahay, cabsi Ilaah isku dhaafiya wakhtiga aad qariibka tihiin."** Waxaa rasuulku leeyahay, **"kan eexasho la'aan wax u xukuma."** Haddaba Ilaah wuxuu xukumaa shuqulka nin waliba iyadoo aan dadka loo kala eexanayn. Ilaah ma leh qof u gaar ah.

Ilaah wuxuu u xukumayaa shuqulka mid waliba oo masiixi ah si daacadnimo ay ku laran tahay. Taasina maahan wax khuseeya badbaadada; waxaase ay khusaysaa sidii noloshaadu ahayd ama ay tahay inta aad dunida ku nooshahay. Haddaba xaqiiqda ah in Ilaah ina xukumayo waa inay inaga dhigto kuwo deggan oo fiiro gaar ah siiya nolosha maanta.

Waa inaan hubsannaa inaynaan iskula muuqan kuwa dadka ka sarreeya ama isla weyn. Haddaba miyaad wejigaaga farxad iyo wanaag ka muujisaa meel waliba ee aad tagto? Iyadoo weliba ayan wejiyadaadu farxad ka muuqan xagga Gudaha? Waxaan kuu sheegayaa saaxiib Injiilku dadka ma siiyo rajo dhimatay, ama la been abuuray. Injiilka wuxuu beddelaa nolosha dadka, wuxuuna ina siiyaa rajo nool oo ku xiran sarakiciddii Masiixa.

Muumintiinta Ilaah waxay nolol ku yeeshaan Masiiba

oo ah Badbaadiyahooda, kaasoo fadhiya haatan gaanta Midig ee Ilaah. Haddaan horey idiiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 1aad ee Warqaddan kowaad ee rasuul Butros ayaa waxaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadaha 18-19, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waxaad og tihiin inaan dabiicaddiinnii bilaashka ahayd oo aad awowayaashiin ka dhaxasheen laydinkaga soo furan waxyaabaha baaba'aya oo ah sida lacagta iyo dahabka, laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn."**

Waxaa rasuulku leeyahay: **"Waxaad og tihiin."** Wuxuu rasuulku taas ula jeedaa inay garanayeen Yuhuuddii uu la hadlayey in la soo furtay. Labadaas aayadood, rasuul Butros wuxuu kaga hadlayaa hawsha Ilaah ee ah badbaadadaada, waana furashada lagaa soo furtay dembiga. Saaxiib, waxay ahayd inuu adiga qiimi kuu bixiyo. Aniga iyo adigaba waxaynu hoos joognaa xukunka Ilaah.

Waayo waxaa Qorniinku leeyahay, **"Naftii Dembaabtaa way dhimataa"** sida ku qoran kitaabkii Yexesqeel 18:4. Ilaah weli waa sidiisii oo naf waliba ee dembaabta way dhimanaysaa, welibana Ilaah isma rogrogo ama wadcigiisa ma beddelo. Waayo isagu waa isku mid shalay, iyo maanta iyo weligiis. Waxaana mar waliba Ilaah ka hor imaasan yahay kuwa sharka leh.

Waxaa dadku ay imminka yiraahdaan, wa kuwa ilbaxa ah e waxaynu nool nahay wakhti cusub, waxaana loo baahan yahay fikirro cusub, iyo damiir cusub, laakiin waxaan idiin sheegayaa in Ilaah aanu

isbeddelin. Wax keenaya inuu is-beddelo ma lahan, waayo wax waliba wuxuu ka garanayaa bilowga. Welibana maahan sida dadka oo waxyaabaha yan ogayn ka akhriya jaraa'idyada.

Wax walia horey buu u sii og yahay, cidnana ma weyddiiyo, mana jiro wax ka habaabin kara tubtiisa. Wuxuuna leeyahay, **"…nafsaddii dembaabta way dhimataa."** Waxaa kaloo rasuul Butrosna leeyahay, "I**naan dabiicaddiinnii bilaashka ahayd laydinkaga soo furan waxyaalha baaba'aya oo ah sida lacagta iyo dahbaka.”**

Haddaba inkastoo dahabka iyo naxaasta la sifayn karo, oo inta weel lagu soo ururio dab lagu soo shidi karo haddana weli waa wax baaba'aya, markaana laynaguma badbaadin dahab iyo qalin baaba'aya. **Waxaana rasuulku leeyahay: "Dabeecaddiinnnii bilaashka ahayd ee aad awowayaashiin ka dhaxasheen."** Taas laguma helo badbaado. Noloshuna gebigeeda wax qiimo ah ma yeelateen oo waxay ahaan lahayd bilaash haddaan la arag furashada Masiixa. Markaa lama arko wax ka qiima yar nolosha banii'aadanka haddii furashada Masiixa laga reebo. Wax waliba oo dunida jooga micno bay leeyihiin.

Ha ahaadeen xayawaanka duur joogta ah ama kuwa dab joogta ah, ama ha ahaadeen kuwa badda ku jira ama haadda hawada. Amase ha ahaadeen xiddigaha cirka ka muuqda intuba waxay leeyihiin asbaab ama ujeeddo hagaagsan. Qorraxda, dayaxa iyo weliba xidig waliba ee samada ka soo laadlaada ujeeddo ayey leeyihiin. Haddaba aadmi aan Ilaah lahayn isaguna macna ma lah. Haddaba laynaguma badbaadin waxyaabo baaba'aya. Marka ay sidaas tahay wax lagu iibsan karo

badbaadada Ilaah xaggiisa inooga timid lama arko. Haddaba saaxiib maxaad adigu leedahay ama haysataa ee Ilaah kaaga baahnaan karaa ee uusan haysan? Haddaba anigu waxaan garanayaa sida aanan qiimi u lahayn Ilaah la'aantiis Waxaan kaloo bartay in ku xirnaanta Ilaah ay wax waliba iiga muhiimsan tahay, oo wax lagu doorsadana ma lahan.

Waxaan kaloo bartay in wax waliba ee Ilaah igu yiraahdo ama aan hadalladiisa ka akhriyo ay run yihiin. Waxaanan bartay saaxiib inaan la arag wax anigu aan haysto oo Ilaah u baahan yahay. Waxaase jira wax Ilaah hayo oo anigu aan u baahanahay, badbaadadiisaba ha ugu horraysee. Haddab maxaynu innagu isku furan karnaa? oo eedda iyo dembiga isaga bixin karnaa?

Lama arko wax aan ku bixinno, su'aahsa kale ee taas ii raacsanina waxay tahay, Sidee baannuu markaa isku badbaadinaynaa. Waxaa rasuul Butros leeyahay: **"Laakiin waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiixa oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn."**

Mar kale ayaa rasuul Butros wuxuu inoo sheegayaa in dhiigga Masiixa aan wax lala simaa jirin. Sidaan horey idiinku soo sheegnay, dadka ahlu diinka ah kama hadlaan dhiigga Masiixa. Oo kiniisadaha qaarkood ayaaban lagu soo qaadin wax ku saabsan dhiigga Masiixa. Waxaanay ku doodayaan in dhiiggu yahay wax aan lagaga dhex hadlin karin kiniisadahooda.

Habase yeeshee aniga ilama ahan wax aan laga hadli karin oo silloon, laakiin waa wax toosan in dhiigga Masiixa loo sheego dadka, rasuul Butros ayaa isna

ugu yeeraya dhiigga Masiixa mid qaali ah. Waa wax ka sii qaalisan dahab iyo weliba qalinka oo beryahaas wax waliba ka qaalisanaa. Oo wuxuu leeyahay, **"...Oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn."**

Simon Butros oo Masiixa la noolaa muddo saddex sannadooda ah ayaa wuxuu leeyahay, **"Dhiigga Masiixu waa wax aan iin iyo ceeb toona lahayn."** Wuxuu leeyahay Masiixu wuxuu ahaa mid aan dembi lahayn. Waxaanan qaadanaynaa hadallada rasuulka. Qorayaasha maanta layskuma hallayn karo oo waxay wax u qorayaan lacag. Ha yeeshee Simoon Butros kuma uusan jirin qorshe uu lacag ama maal ku tabcayo, wuxuuse diiradda saaray sidii dadka uu ugu sheegi lahaa ama dhexdooda uga markhaati furi lahaa silici iyo qodbiddii Masiixa, oo ay tahay in dadka lala wadaago.

Wuxuu rasuulku leeyahay haddaan idiinku celiyo wixii laynagu badbaadiyey, sidatan: **"...laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn."** Taasina waa jumlad isa soo taraysa oo dhammaystiran oo rasuulku kaga warramayo badbaadadeenna ama furashadeenna. Taasina hubaal waa wixii Ilaah aniga iyo adigaba u sameeyey. Haddaan meeriska cutubka kowaad ee Warqaddan rasuul Butros horey idiinku sii wadno ayaa waxaa rasuul Butros leeyahay sida ku qoran 1:20, waxaana qoran sidatan:

**"Isaga horaa loo yiqiin intaan dunida la aasaasin, laakiinse wakhtiyadii dhammaadkoodii ayaa loo muujiyey idinka aawadiin."**

Wuxuu rasuulka oo Ruua Qoduuska ah ee Ilaah ka dul hadlayo uu leeyahay: **"Isaga horaa loo yiqiin intaan dunida la aasaasin."** Haddaba doorashada madaxa-bannaan ee Ilaah ayaa iaga horey loogu doortay, waxaanay ku ahaatay go'aan rabbaani ah, oo ku salaysan qaadirnimada Ilaah oo dhaafsiisan wax waliba, oo doorashadiisana waa kaamil. Waxaan u malaynayaa in garashadeenna yar marka loo eego tan Ilaah, ayaa kenaysa inaan Ilaah wax waliba uga harno. Wuxuuna leeyahay qalbi ama niyad teenna ka sarraysa ama ka weyn, garashada Ilaah ee sarraysa waxay dhaafsiisan tahay wax kasta.

Haddaba wuxuu rasuulku inoo sheegayaa aqoonta sarraysa ee Ilaah ee uu ku garanayey Masiixa intaan dunida la uumin. Haddaba Masiixu waa wankii Ilaah ee horey loogu diyaargareeyey dadka intaan dunida la uumin. Waxay taasu muujinaysaa garashada baahsan ee Ilaah taasoo aan xadaysnayn. Markaa wuxuu leeyahay doorka ah in wax waliba sida ay tahay uu u go'aamiyo iyo in doorashadiisa innaguna aynu xushmayno ama qadarinno.

Waxaannu dhammaan-tayo u wada baahan nahay Badbaadiye, oo welibana midkaya waliba wuxuu ku jecel yahay jacayl dhammaystiran. Waana jacaylkii gaarsiiyey inuu inoo keeno Badbaadiye. Haddaba uma baahni wax kale, jacayl iyo naxariis badan oo furasho igu siiya Nimcadiisa. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegyastayaal meeriska cutubka ayaannu imminka isla eegaynaa Warqaddii kowaad ee rasuul Butros 1:21, waxaana qorniinku leeyahay sidatan: **"Idinkoo isaga aawadiis ku ah kuwa rumaysan Ilaaha isaga ka soo sara kiciyey kuwii dhintay oo ammaanay**

**isaga, in rumaysadkiinna iyo rajadiinnu ay Ilaah ku xidhnaadaan aawadeed."**

Wuxuu leeyahay rasuulku **"...Ilaaha Isaga ka soo sara kiciyey kuwii dhintay..."** Wuxuuna markan iyada ah Simoon Butros ina xusuusinayaa sarakicidda Ciise Masiix dhimashadii ka sara kacay. Wuxuuna raacinayaa oo uu leeyahay, markii aad garataan in Masiixu sara-kacay, waxay taasu idiin keenaysaa buu leeyahay, **"…inaad rumaysadkiinna iyo rajadiinnu ay Ilaah ku xidhnaadaan aawadeed."** Rasuul Butros waa rasuul lagu yaqaan inuu adkeeyo rajada, rajaduna waxay ku dhex jirtaa Masiixa waana inaynu leenanahay bdbaadiye nool.

Waana kan imanaya maalin maalmaha ka mid ah oo u imanaya inuu kiniisaddiisa kula kulmo hawada. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka kowaad ayaannu haatan idiin akhriyeynaa aayadda 22aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Sidaad naftiinna u daahiriseen markaad addeecedeen runta xagga jacaylka walaalnimada oo aan iska yeeleyeel ahayn, aad iyo aad qalbiga isaga jeclaada."**

Wuxuu rasuulku leeyahay, **"Sidaad naftiinna u daahiriseen markii aad addeecdeen runta xagga jacaylka walaalnimada."** Hadallada Ilaah waa sheey daahiriya nafsadda qofka.

Waxaannu garanaynaa in televisionnada maanta kuwo badan ay ka xayeesiyaan badeecadooda. Waxaanay dhammaantood marka ay alaabtooda xayeesinayaan inooga dhigayaan sheey qaali ah ooa y tahay inaan si degdeg ah sheeygaas ay xayeesinayaan u iibsanno. Waxaa ka mid ah saabuunta iyo waxyaabaha dharka lagu

mayro.

Waxaans ekuu sheegayaa tan kaleiya ee nafsadda banii'aadanka lagu dhaqo inuu yahay Hadalka Ilaah. Waa waxa keliya ee ka meyri kara qofka xargagga dembiga. Waa Hadallada Ilaah waxa qofka ka meyri kara dembiyadiisa, oo badankeen waxaannu u baahan nahay inaynu ku soo dhowaanno. Waxaana rasuulku ku talinayaa oo uu leeyahay, **"Aad iyo aad qalbiga isaga jeclaada."** Xiriirka ama sida aad ugu dhow dahay Hadallada Ilaah ayaa keenaysa xiriirka aad la leedahay rumaystayaasha kale.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka kowaad ayaannu haatan idiin akhriyeynaa aayadda 23aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

**"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayan oo ah erayga Ilaah oo nool oo waara."**

Rasuul Butros wuxuu dib inoogu soo celinayaa Hadallada Ilaah. Wuxuu ka hadlayaa wax ku saabsan hawshii Ilaah ee samatabbixinta. Wuxuu garanayey hawsha muhiimka ah ee Ilaah inay ahayd in Masiixu inoo dhinto--taasina ay ku imanayso furashadeenna. Waxaanay taasu dhacday ugu dhowaan 2000 oo sannadood ka hor, oo wax aynu ku dari karno ama wax aynu ka qaadi karno badbaadadaas lama arko.

Waa Badbaado dhammaystiran oo Ilaah, haddiise ad doonayso inaad ka mid noqoto muuminiinta Ilaah waxaa lagaa doonayaa inaad mmar kale dhalato, oo aad xagga ruuxa ka dhalato. Waana wixii Sayid Ciise Masiix ku yiri ninkii Farrisiga ahaa ee la oran jiray Nikodemos sida ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka 3aad, aayadaha 1-5, inkastoo aynaan

idiin akhriyeynin.
Nikodemos wuxuu ahaa nin ahlu diin ah, waxaana lagu leeyahay waa inaad Ruuxa Ilaah ka dhalato. Waxaana la mid ah mid waliba oo doonaya inuu noqdo xerta Maiixa.Rasuul Butrosna wuxuu leeyahay, sida ku qoran aayadda 23aad oo ah aayad caan ku ah masiixyiinta dhexdooda, sidatan: **"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah eryaga Ilaah oo nool oo waara."**

**SONG: REEL----CUT-----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.
Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin